Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Shabakadda Nidaamka Ka Sii Digista Abaarta (FEWSNET) ayaa sheegtey in roobabka Deyrta (Oktoobar – Disembar) ee hadda dalka oo dhan ka da'ayaa ay ilaa iyo hadda yihiin kuwo wanaagsan. Wararka gudaha ka imaanaya ayaa sheegay in roobab xooggani ay ka da'een Baladweyne, gobolka Hiiraan iyo Ceel Waaq iyo Beled Xaawo oo ka tirsan gobolka Gedo. Dadka qaar ayaa ku khasbanaadey in ay u guuraan dhul ka sarreeya halkii ay degganaayeen markii ay biyuhu maasheeyeen guryahoodii iyo qaar ka mid ah dhismayaashii fayadhowrka taas oo ay ka dhalan karto halis caafimaad. Magaalada Ceel Waaq, ayaa qoysas lagu qiyaasey 350 ay ka barokaceen.

Waaxda Lafagurka Haqab-beelka Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU), Maareynta Macluumaadka Biyaha iyo Dhulka ee Soomaaliya (SWALIM), oo labadaba ah waaxo farsamo oo hoos taga Ururka Cuntada iyo Beeraha (FAO) iyo shabakadda FEWSNET ayaa sameeyey Kooxda Macluumaadka Fatahaadaha u qaabilsan. Kooxdan waxa ay dib u eegeysaa, saddex-xagleyneysaa ayna isukeeneysaa dhammaan wararka soo baxa ee ku saabsan fatahaadaha waxaana ay sameyneysaa iswaafajinta ugu wanaagsan ee suurtagalka ah ee xaaladda markaa jirta ee fatahaadda iyo raadka ay reebtey. Kooxdu waxa ay hadba sida loogu baahso u soo saareysaa warbixin-maalmeed ku saabsan xaaladda fatahaadda. Qof kasta oo haya macluumaad ku saabsan fatahaado waa in uu u soo gudbiyaa Kooxda Macluumaadka Fatahaadaha isaga oo ugu soo diraya floodinfo@fsnau.org. SWALIM ayaa sameysey *Website* - http://www.faoswalim.org/subsites/frrmis/index.php, taas oo ay ku jiri doonaan wararka ugu dambeeya ee Kooxda Macluumaadka Fatahaadaha, heerarka biyaha webiyada iyo warbixinnada cimilada, iyo xog aasaasi ah iyo mid taariikheed oo ku saabsan degaannada halista fatahaaddu ka jirto. Arrin si aad ah looga welwelsan yahay ayaa ah gaaridda/galaangalka kooban ee ay hay'aduhu u leeyihiin degaannada halista ugu jira fatahaadda. Kooxda Dalka ee QM ayaa ku taliyey in waraaq hordhac ah loo qoro maamullada xukuma degaannadaas taas oo looga codsanayo in goobahaa la soo gaari karo.

28kii Oktoobar, ugu yaraan afar qof ayaa ku dhintey in ka badan 10 kalena waa ay ku dhaawacmeen degmooyinka Hodon iyo Howl Wadaag ee magaalada Muqdisho waqti uu socdey dagaal u dhexeeya kacdoonsanayaasha iyo Dowladda Federalka Ku-meelgaarka ah/Hawlgalka Afrika ee Soomaaliya (AMISOM). 27kii iyo 29kii Oktoobar, ayaa booliiska iyo ganacsato degaanka ah ay iskudhacyo ku dhex mareen magaalada Gaalkacyo ee Puntland markii shaqaalaha dowladda hoose ay isku dayeen in ay burburiyaan dhismayaal sharci-darro ah oo laga dhisey suuqa. Ugu yaraan 11 qof ayaa ku dhintey afar kale ayaana ku dhaawacmey.

Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ee QM ahna Xiriiriyaha Gargaarka Degdegga ah ayaa toddobaadkan u qoondeeyey shan hay'adood oo kuwa bani'aadamnimada ah oo ka shaqeeya Soomaaliya US$ 12 milyan oo uu bixiyey Sanduuqa Dhexe ee Waxqabadka Degdegga ah (CERF). Mashaariicda UNICEF, FAO, UNHCR, WFP iyo WHO ee lacagtaa heley ayaa waxa ay wax ka qaban doonaan xaaladaha degdegga ah ee biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda, taageerada nolol-raadsiga, cuntada gargaarka ah ee ay heleen carruurta iyo hooyooyinka nugul, wax ka qabashada jadeecada dillaacda iyo taageeridda bixinta hawlgallada gargaarka. Codsigii bani'aadamnimada 2009ka ee Soomaaliya ayaa hadda la maalgeliyey 58 boqolkiiba.

29kii Oktoobar, Qaramada Midoobey ayaa Soomaaliya ku xustey sanad-guuradii koowaad ee ka soo wareegatey qaraxyadii Hargeysa. Mid ka mid ahaa weeraradii qaraxyada ee shanta ahaa ee Hargeysa iyo Boosaaso ayaa lagu beegsadey xarunta Qaramada Midoobey halkaas oo lagu diley laba shaqaale laguna dhaawacay lix kale. Madaxa Xafiiska QM ahna Xiriiriyaha Bani'aadamnimada ee Soomaaliya, Mark Bowden, ayaa qoraal uu soo saarey ku yiri, "Hal sano ka dib markii ay dhaceen weeraradaas aadka u xumaa, waxa aan si weyn ugu ammaanayaa saaxiibadeyda aan isla shaqeyno ee muujiyey sida ay uga go'an tahay in ay si hagar la'aan ah gacan uga geystaan in ay Soomaalida ka soo kabtaan iskahorimaadyada haystey 18 sanadood, iyada oo ay jirto halista ballaaran ee ay maalin kasta la kulmaan iyo caqabadda ay taas ku keento shaqadooda." Waxa uu intaa raaciyey in waqtiyada kuwan oo kale ah ay QM cusbooneysiiso ballanqaadkeeda ah in ay u shaqeyneyso Soomaalida ayna kala shaqeyneyso in ay gaaraan horumar joogto ah oo waara.

Waxqabadka

WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa 307 metrik ton oo badeecooyin cuntooyin kala duwan ah u qaybiyey 22,590 ka-faa'iideystaal ah taas oo hoos imaneysey barnaamijka quudinta dheeriga ah ee gobollada Baay iyo Bakool. Puntland, ayaa 55,944 oo qof oo kale ay ka faa'iideysteen 605 metrik ton oo badeecooyin cunto ah oo loo qaybiyey.

Ilaa 1,500 oo carruur ay da'doodu u dhaxayso 6-36 bilood ayaa ka-faa'iideysanaya *plumpy'doz,* oo ah cunto u diyaarsan in la cuno oo hodon ku ah nafaqo, oo laga qaybinayo 24 degsiimooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay ah oo ku yaalla magaalada Burco ee Somaliland. Qaybinta cuntadaas ayaa sidoo kale Koonfurta/Bartamaha ka bilaaban doonta bisha Nofembar taas oo lagu beegsanayo 108,000 oo carruur ah. Ilaa hadda, 132,000 oo carruur ah ayaa la gaarey.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org